



# SU'AALAHHA BADANAA LA IS WEYDIYO EE KU SAABSAN TIRAKOOBKA

*10 sano walba, Mareykanka wuxuu tirakoobaa qof walba oo jooga wadanka iyada oo loo marayo tirokoobka qaranka. Natijada waxay sheegaysaa sida lacagta loogu qeybiyo shayada sida dugsiyada, guri la awoodi karo, isbitaalada, iyo gaadiidka dadweynaha tobanka ee soo socda. Tirada waxay go'aamineysaa inta xildhibaan ee uu kongressku yeelan doono.*

## **Waa maxay tirokoob?**

Waa sida aan u tirino dadka ku nool wadanka – qof walba oo degan iyada oo aan loo eegaynin heerka socdaalka.

## **Ma jirtaa su'aasha dhalashada?**

Maya – tirakoobka MA lahan su'aal ku saabsan dhalashada ama heerka socdaalka.

## **Maxay muhiim ugu tahay dowladda in dadka la tirokoobo?**

Waa sida ay dowladdu ku ogaaneyso halka lacagta looga baahan yahay – Waxyaabaha sida sida dugsiyada, guri la awoodi karo, isbitaalada, iyo gaadiidka dadweynaha. Waxay sidoo kale go'aamineysaa inta xildhibaan ee gobolka Washington u yeelan doono Kongreska.

## **Maxaan uga qeyb galaya tirakoobka?**

Marka aad buuxisaa tirakoobka, waxaad hubineysaa in bulshadeena si buuxda loogu matalo xogta si loo go'aamiyo sida aan u maalgeliniyo iyo matalida. Kaqaybgalkaagu wuxuu ka caawinayaa canshuurtaada dollarka inay ku noqoto bulshadaada.

## **Gormee ayuu dhacaya tirakoobka?**

Laga bilaabo Maarso 12, dadku waxay boostada ku heli

doonaan waraaqado ay ku qoran yihiin macluumaad ku saabsan sida loo buuxinayo tirakoobka. Waxaad ku buuxin kartaa onlayn-ka ilaa Luuliyo 31. Haddii aadan heysanin internet ama u baahan tahay caawin, waxaa jiro meelo bulshada oo aad ka helayso taageero.

## **Yaa la tirakoobayaa?**

Qof walba oo ku nool qoyskaaga laga bilaabo Abril 1, 2020 ayaa la tirakoobaya foomka tirakoobka. Tani waxaa ku jira carruurta iyo dhalaanka dhasha Abril 1 ilaa iyo dadka da'da ah, qarabada iyo kuwa aan qarabada aheyn, iyada oo loo eegayn xaaladda socdaalka.

Haddii qof qoyskaagu ka mid ah uu waqti badan ku qaato in ka badan hal guri, waa in lagu tirokoobaa halka ku noolyahay iyo halka inta badan u seexdo.

## **Sidee ayaan buuxin doonaa tirakoobka?**

Qaabka ugu fufud ee lagu buuxin karo tirakoobka waa 2020census.gov. Waxaa sidoo kale ku buuxin kartaa telefoonka ama foomka warqadda.

## **Halkeen u tagaya wixii macluumaad dheeraad**

**ah:** Boqo **2020census.gov** ama Khadka Lacagta La'aanta ee Waaxda Tirakoobka, ee ku qoran dhanka ee Warqaddan.



# WAA NAKAN. WAAN TIRINAA.

## Kadib Maarso 1, U wac caawin:

### LAMBARKA LACAGTA LA'AANTA EE

English

Spanish

Chinese (Mandarin)

Chinese (Cantonese)

Vietnamese

Korean

Russian

Arabic

Tagalog

Polish

French

Haitian Creole

Portuguese

Japanese

English (Puerto Rico)

Spanish (Puerto Rico)

Telephone Display Device (TDD)

Español

普通话

广东话

Tiếng Việt

한국어

Русский

العربية

Wikang Tagalog

Język Polski

Français

Kreyòl Ayisyen

Português

日本語

Español (Puerto Rico)

### EE LUUQADA

844-330-2020

844-468-2020

844-391-2020

844-398-2020

844-461-2020

844-392-2020

844-417-2020

844-416-2020

844-478-2020

844-479-2020

844-494-2020

844-477-2020

844-474-2020

844-460-2020

844-418-2020

844-426-2020

844-467-2020